



KU SOCOTA WAALIDIINTA:



TIJAABADA MAQALKA EE ILMAHA DHASHAY TALO SOO JEEDINTA NATIJADA DHAKHTARCALE LAGUU DIREY

WARQADDAN U QAAD DHAKHTARKA ILMAHAAGA

Ku: Dhakhtarka: _____
(Primary Care Provider):

Xarunta Caafimaadka: _____
(Clinic):

Magaca Ilmaha: _____
(Baby's Name):

Taariikhda dhalashada Ilmaha: _____
(Baby's Date of Birth):

Isbitaalka: _____
(Hospital):

Taariikhdi ugu dambaysay ee lagu sameeyey tijaabada maqalka dhagaha:
(Date of Last Hearing Screen): _____

Dhagta Midig: Ku gudbay Dhakhtar kale loo diray
(Right Ear): Pass Refer

Dhagta Bidixda: Ku gudbay Dhakhtar kale loo diray
(Left Ear): Pass Refer

Balan baa loo sameeyey lagu tijaabinayo/dib loogu baarayo: Haa Maya
(An appointment for hearing testing/rescreen was made): Yes No

Taariikhda iyo Goobta: _____
(Date and Location):

LA SOCOSHADA MAQALKA ILMAHAAGA WAA MID FUDUD SIDA 1, 2, 3!

1. Ilmahaagu KUMA AANU gudbin tijaabada maqalka. Taasi micnaheedu ma aha in aanu wax maqlayn laakiin waxa ay micnaheedu tahay in AAD BAARITAAN DHEERAAD AH ILMAHAAGA KU SAMEYSO si loo ogaado si la hubo maqalka ilmahaaga. Maqalka ilmaha LAGUMA tijaabin karo guriga. Ilmaha aan si hagaagsan wax u maqal waxa uu noqon karaa mid jaleeca isla markaana u jeesta dhinaca uu cod ka maqlo.
2. Warqaddan horey u soo qaado marka aad ilmahaaga dhakhtarka u soo qaadeyso isla markaana dhakhtarkaaga kala hadal. Dabagal degdeg ah waa mid muhim ah si waqti hore loo ogaado haddi ilmuhu maqalka dhibaato ka qabo loona bilaabo daweynta.
3. Waa in aad sameysaa qorshe sida ugu dhaqsaha badan maqalka ilmaha baaritaan loogu sameeyo.



Natijada **DHAKHTAR KALE LAGUU**



DIREY iyo Maqalka Ilmahaaga

Tijaabada Maqalka waa Muhim

Hadalka iyo maqalka waa kuwo bilowda in ay koraan marka ilmuhu dhasho kadib, inkastoo aaney ilmuhu inta badan hadlin ilaa ay ka gaaraan hal sano. Ilmaha ku dhasho maqal la'aanta waxaa suurtoagal in ay ku adkaato hadalka iyo luqadda lagu hadlo. Haddii aanu ilmuhu wax maqli karin ma aha mid inta badan ku adag in dhakhtarka iyo waalidku ay ogaadaan. Baaritaanka lagu sameeyo iyo tijaabooyinka daba jooga ayaa ah dariiqada kaliya oo waqti hore lagu ogaan karo in ilmuhu aan wax u maqlayn. Ogaanshaha aad ogaato in ilmahaagu aanu wax maqlayn waxa aad adiga iyo ilmahaagaba inuu helo fursad wanaagsan oo ay ku wada xiriirtaan isla markaana kaga hortagtaan dib u dhac ku yimaada.

Haddii ilmahaaga loo diro **DHAKHTAR KALE**, taasi ma waxa ay ka dhigan tahay in aanu waxba maqlayn?

DHAKHTAR KALE oo lagu direy waxa ay ka dhigan tahay in ilmahaagu aanu ku gudbin baaritaanka maqalka. Dhawr sababood ayaa keeni kara natijada keentay in ilmahaaga **DHAKHTAR KALE** loo diro. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in qoyaan (dheecaan) ama wasakh kale ku jiraan dhagta ilmaha taasoo hor istaagi karta baaritaanka - ilmahaas si wanaagsan ayuu wax u maqli karaa. Marar kalana waxaa dhici karta in aanu ilmuhu waxba maqlayn. Ilmaha natijadooda **DHAKHTAR KALE** loo diro waxa ay u baahan yihiin inuu arko dhakhtar ku takhasusay maqalka (Audiologist) si uu u xaqiijiyo in ilmahaas uu maqalka ka jirran yahay iyo in kale.

Warqaddan tus dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaadka ee ballanta kaaga sameyneysa dhakhtarka ku takhasusay maqalka (Audiologist).

Maku fiirin karaa maqalka ilmahaaga guriga?

Inkasta oo ay u egtahay in ilmahaagu uu guriga marka uu joogo wax maqli karo – isaga ama iyada oo jelaaca ama u jeesta marka uu cod dheer maqlo ama dhinacaaga u jeesta marka aad sacab tunto – waxaa muhim ah in aad weli hubiso maqalka ilmahaaga.

Carruurta aan si hagaagsan wax u maqal waxa ay ku baraarugi karaan codadka dhaadheer, laakiin ma maqli karaan codadka si dabacsan loo dhaho, sida kaaga oo kale.

Tijaabada maqalku waxa ay kaa cawineysaa in la ogaado dhamaan noocyada kala duwan ee maqalka, oo ay ka mid yihiin maqal la'aan aadan adiga iyo dhakhtarkaagaba ogaan karin, Dhakhtarkaaga ama dhakhtarka takhasuska ku leh maqalka ayaa kuu sharxaya waxyaabaha la sameynayo marka la sameynayo tijaabada maqalka.

KALA HADAL DHAKHTARKA ILMAHAAGA MARKA UGU HOREYSA EE AAD ILMAHA U GEYSO

Dhakhtarka ilmahaaga ama xarunta caafimaadka ayaa kaa caawinaya wixii su'aalo ah ee aad ka qabto maqalka ilmahaaga.

La socodsii dhakhtarka ilmahaaga ama xarunta caafimaadka natijada ka soo baxday tijaabada maqalka ee ilmahaaga si ay kuugu sameeyaan ballan lagu sameeyo baaritaan dheeraad ah.

Haddii aad su'aal ka qabtoaan baaritaanka maqalka, fadlan la soo xiriir barnaamijka baaritaanka maqalka ee ilmaha dhasha (Newborn Screening Program) oo lagala soo xiriir karo (800) 664-7772 ama soo booqo barta internetka ee www.health.state.mn.us/newbornscreening